# Labo eray oo ku fudud Carabka, kuna culus Miisaanka, Raxmaankuna jecel yahay

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey in Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: "Labo eray oo ku fudud Carabka, kuna culus Miisaanka, Raxmaankuna jecel yahay: waa: Subxaana Allahi Alcadiim, Subxaana Allahi wa Bixamdihi."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay laba eray oo dadku u oran karaan si fudud iyo xaalad kasta oo ay joogaan, oo ajarkoodu ku wayn yahay miisaanka, Rabigeena Raxmaankuna jecel yahay. Subxaana Allaahi Alcadiim, Subxaan Allaahi wa Bixamdihi, ereyadaani Ilaahay waxay ku sifaynayaan waynaan iyo kaamilnimo, iyo in Ilaahay laga nasaho nuqsaanta isagaa sareeyee.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/5507